


# Muxuu dhakhtarkaaga ilkaha NHS kuu qabtaa adiga?

NHS waxay bixisaa daaweyno muhiim ah ee loo baahan yahay si looga dhigo afkaaga, ilkahaaga iyo ciridkaaga kuwa caafimaad qaba oo xor ka ah xanuun. Daawayn kasta oo caafimaad ahaan lama huraan ah waa in la heli karaa. Halkan waxaa ah talooyin iyo faahfaahin qaar ee daawaynta iyo kharashaadka, ku siinaysa aqoonta aad ugu dhoola cadaynayso si kalsooni leh.

**Raadinta  
dhakhtarka ilkaha  
[www.nhs.uk/dentists](http://www.nhs.uk/dentists)**




## Booqashada dhakhtarkaaga ilkaha inta lagu jiro safmarka COVID-19

- Fadlan booqo keliya goobtaada caafimaadka haddii aad leedahay ballan oo diiwaanso ballanta keliya haddii ay lama huraan tahay – dhakhaatiirta ilkaha hadda waxay ahmiyada saarayaan kuwa itaalka darran ama kuwa baahida ugu degdega badan qaba.
- Ballamaha qaar daawaynta caadiga ah, sida baaritaanada ilkaha, dib ayaa ballan loogu dhigi doonaa taariikh dambe.
- Goobtaada caafimaadku way ka duwanaan doontaa sida caadiga ah maadaama ay u hawl geli doonaan qaab ilaalinaaya kala fogaanshaha bulsho iyo sharciyada caafimaadka ee Covid-19 si loo xaqiijiyo badbaadada qof kasta.

## Booqashadaada caadiga ah ee koowaad.

- Goobta caafimaadka ilkaha waxay qaadi doontaa taariikhdaada caafimaadka iyo ilkaha (haddii la heli karo) oo waxay sameyn doontaa baaritaan, baaritaanka afkaaga, ilkahaaga iyo ciridkaaga.
- Ka dib baaritaankaaga haddii dhakhtarkaaga ilkahu ku taliyo daawaynta ilkaha, waxaa lagu siin doonaa qorshe. Tani waxay muujinaysaa dhammaan daawaynta aad qaadanayso iyo inta uu leeg yahay kharashku. Haddii aan lagu siinin qorshe daawayn ah, waydiiso hal.
- Dhakhtarkaaga ilkaha ayaa kugula talin doonaa taariikhda booqashadaada xigta. Dadka caafimaadka afkoodu wanaagsan yahay waxay u baahan doonaan inay yimaadaan 12 ilaa 24 bilood oo kasta, laakiin kuwa qaba dhibaatooyin badan waxay u baahan doonaan inay badanaa soo booqdaan.



## Daryeelka ilkaha degdega ah


Haddii aad xanuun dareemayso ama aad u baahan tahay teegeero, caawimo ama talo, fadlan telefoon u dir goobtaada ilkaha sida caadiga ahayd. Haddii aadan lahayn dhakhtar ka ilkaha caadiga ah oo aad qabto baahi degdega ah waxaad waci kartaa khadkaaga caafimaadka ilkaha ee maxaliga ah.

Greater  
Manchester:  
**0333 332 3800**  
Cheshire iyo  
Merseyside:  
**0161 476 9651**

Lancashire:  
**0300 1234 010**  
South Cumbria:  
**01539 716 822**

# Lacag bixinta

Waxaad bixinaysaa tabarucaadka dhanka kharashka daryeelkaaga oo waxaa lagugu soo dalacaa daawaynta ku tiirsan qaybta ay ka mid noqdaan. Dhammaan daawaynta NHS waxaa lagu daboolaa 12 bilood oo damaanad ah.



**Qaybta 1**  
(Ay ku jirto daawaynta degdega ah)  
£ 23.80

**Qaybta 2**  
£ 65.20

**Qaybta 3**  
£ 282.80

Qiimayaasha saxda ah ee 2020 / 21

BILAASH

## Ma ahan inaad bixiso daawaynta ilkaha ee NHS haddii aad:

- ka yar tahay 18 ama 19 oo aad ku jirto waxbarashadda wakhtiga buuxa
- uur leedahay ama ilmo aad dhashay 12 bilood ee hore.
- lagugu daweeay isbitaalka NHS oo daawayntaada uu fuliyay dhakhtarka ilkaha isbitaalka (laakiin waa inaad bixisaa ilkaha la geliyo ama lakabyada)
- helayso dheefaha dakhligooda hooseeyo, ama aad ka yar tahay 20 oo waxaad ku tiirsan tahay qof helaaya dheefaha dakhligoodu hooseeyo.

## Daawaynada

### • Qaybta 1

(daawaynta degdega ah) waxay dabooshaa daryeelka degdega ah, sida xanuun baabiye iyo buuxino ku meel gaarka ah.

### • Qaybta 1

waxay dabooshaa baaritaaka, cudur aqoonsashada, cabirka iyo baaslahaynta haddii caafimaad ahaan loo baahdo, daryeelka ka hortagga ah (sida marinta falooraaydhka) iyo talada ku saabsan sida looga hortaggo dhibaatooyinka mustaqbalka.

### • Qaybta 2

waxay dabooshaa shay kasta oo lagu xusay Qaybta 1, lagu daray daawayn kasta oo dheeraad ah sida buuxinta, shaqada jirida iliga ama ka saarida ilkaha.

### • Qaybta 3

waxay dabooshaa shay kasta oo lagu xusay Qaybta 1 iyo 2, lagu daray daboolka iliga la geliyo, ilkaha macmaalka ah, lakabyada iyo shaqada kale ee shaybaarka.



## Wax badan ka ogow...

Websaydka NHS wuxuu leeyahay macluumaad badan oo ku saabsan adeegyada ilkaha

[www.nhs.uk/using-the-nhs/nhs-services/dentists](http://www.nhs.uk/using-the-nhs/nhs-services/dentists)